NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.®

SHIRKADA XARIIRKA LA LEH NATIONWIDE CHILDREN'S AFFILIATED OGEYSIINTA DHAQAMADA ARRIMAHA GAARKA AH

Taariikhda Dhaqangalka: Febraayo 16, 2026

Ogeysiintaan waxay sharaxaysaa sida macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan ee laga yaabo in loo isticmaalo oo loo shaaciyo iyo sida dhammaan bukaannada shirkadu ku heli karaan macluumaadkan. Fadlan si taxadar ah dib ugu eeg ogeysiintaan.

I. Shirkadaha Iskaashiga La leh ee ku qoran Ogaysiiskaan

Ogaysiiskaan Xeerarka Sirta ("Ogaysiiska") ayaa quseeya Shirkada Caymiska ee Iskaashiga Laleh Nationwide Children's Hospital ("ACE"). Shirkada Nationwide Children's Hospital ACE (oo sidoo kale loogu yeeraayo "anaga" marka lagu xusaayo Ogaysiiskaan), waxaa kamid ah shirkadaha soo socda:

- Nationwide Children's Hospital
- Center for Child and Family Advocacy oo ku taala Nationwide Children's Hospital d.b.a. Xarunta Badbaadada Qoyska iyo Bogsiinta (Center for Family Safety and Healing)
- Machadka Rajada ee Carruurta (Children's Radiological Institute)
- Ururada Cilmiga Carruurta Ee Columbus (Pediatric Pathology Associates of Columbus)
- Machadka Ururka Cudurada carruurta, Inc.
- Children's Anesthesia Associates, Inc.
- Ururka Iskaashatada Qalliinka Carruurta (Children's Surgical Associates Corporation)
- Dhaqaatiirta Carruurta, LLC
- Daawacda Jirka Carruurta iyo Dhaqancelinta Dhaqaatiirta, LLC
- Nationwide Children's Hospital Toledo, LLC
- Children's Newborn Medicine, LLC
- Northwest Pediatric Specialists, LLC

Xeerka Isla xisaabtanka iyo Hufnaanta Caymiska Caafimaadka ee soo baxay 1996, sida wax looga badelay ("Health Insurance Portability and Accountability Act, HIPAA") wuxuu u baahan yahay inaan ilaalino asturnaanta Macluumaadkaaga Caafimaadka ee La Ilaaliyo ("PHI") oo aan ku siino Ogeysiiskaan sida uu qabo waajibaadkeena sharciga ah iyo dhaqamada asturnaanta. Waxaa nalooga baahanyahay in aan ogeysiino shaqsiyaadka ay saameysay ee xigta jabinta PHI aan la hubin. Waxaa nalooga baahanyahay in aan u hogaansanaano sharciyada Ogeysiintan, taas oo laga yaabo la beddelo waqti ilaa waqti. Waxaan leenahay xaqa lagu badelayo Ogeysiintan Dhaqamada Arrimaha gaar ahaanshaha iyo si loo sameeyo wixii dhaqamo kale ee cusub ee dhaqan gal u ah macluumaadka aan mar hore haynay iyo macluumaadka aan heleyno mustaqbalka. Wixii isbeddelo ah ee lagu sameeyo Ogeysiintan Dhaqamada Arrimaha gaar ahaanshaha ee aaga Diiwaanka Bukaanka, la soo dhigay bogga webseedkeena (www.nationwidechildrens.org), oo diyaar lagaaga dhigay ballantaada xigta.

II. Heshiiska Daryeelka caafimaadka ee Abaabulan

Waxaan aqbalay inaan ka qaybgalno heshiiska Daryeelka caafimaadka ee Abaabulan ("OHCA") oon kula heshiinay Bon Secours Mercy Health, Inc.("BSMH").

Waxaan PHI ga la wadaagi doonaa ka qaybgale kasta oo ku jira OHCA si uu u sameeyo daawayn, qarash bixin, ama daryeel caafimaad oo la xariira OHCA, sida uu haddii kale fasaxaayo sharcigu, ama sida ku cad Ogaysiiska Maaraynta Xogta Sirta. Waxaan sidaas ku sameyn doonaa diiwaan caafimaad oo elektaroonig ah oo wadaag ah ("EHR"). OHCA wuxuu qabanayaa shirkad kasta oo la shaqaysa Nidaamka Iskaashiga ee Nationwide Children's Hospital taasoo adeegsatay diiwaanka elektarooniga wadaaga ah ee BSMH.

Ogaysiiskaan ma abuuraaya xariir wakaaladeed, heshiis wada jir ah, ama xariir kale oo kasta oo sharci oo u dhexayn kara shirkada iskaashiga laleh Nationwide Children's Hospital ACE iyo BSMH, midkoodna labada dhinac masuul kama ahan ficilada ama khaladaadka kan kale.

III. Macluumaadkee ayay Ogeysiintan quseysaa?

Xogta Caafimaadka ee Dhowrsan ama PHI waa xogta aad na siiso ama aan abuurno aama helno ee kugu saabsan taasoo khuseyso xaaladaha caafimaadka jirka iyo dhimirka ee waagii hore, hadda iyo mustaqbalka ee bukaanka; ama qarashka waagii hore, hadda, ama mustaqbalka ee daryeelka la siiyay bukaanka. PHI waxa akamid ah xogta dadka ayna ku jiraan magaca, ciwaanka, da'da, isirka, iyo jinsiga bukaanka.

IV. Qaababka Aan U adeegsan Karno ama U faafin Karno Xogtaada PHI si loogu adeegsado Daawaynta, Bixinta Qarashka iyo Shaqooyinka Daryeelka Caafimaadka

Waxaan isticmaali karnaa ama cid kale la wadaagi karnaa PHI kaaga iyada oo aan oggolaansho qoran lagaaga qaadan (Fasax) si loogu adegesado hawlaha badan ee ku badan isbitaallada. Tusaalaha, uma baahnin ogolaanshaha adiga kaa yimid ee isticmaalada iyo shaacinada soo socda:

Daawada. Waxaan isticmaalnaa oo wadaagnaa PHI-gaada ay ku siiso daryeel iyo adeegyada kale adiga--tusaale, si loo baaro iyo loo daaweeyo dhaawacyadaada ama jirada. Intaa waxaa dheer, waan kula soo xiriiri karnaa si aan kuu siino xasuusiyayaasha ballanta ama macluumaadka ku saabsan dooqyada daaweynta. Waxaa laga yaabaa in aan kuu sheegno wax ku saabsan faa'idooyin la xiriiro caafimaadka kale iyo adeegyada laga yaabo in aad xiisaynayso. Waxaan sidoo kale la wadaagi karnaa PHI dhaqaatiir kale, kalkaalisada, iyo kuwa kale ee ku lug leh daryeelkaaga.

Si loo Helo ama Loo Baxsho Qarashka. Waxaa laga yaabaa in aan isticmaalno oo la wadaagno PHI si loo helo lacag bixinta adeegyada aan ku siino. Tusaale, waxaa laga yaabaa in aan wadaagno PHI-gaada si aan u codsano oo uga helno lacag bixinta Medicare, Medicaid, caymiyaha caafimaadkaaga, Uururka Ilaalinta Caafimaadka (HMO), ama shirkada kale ama barnaamijka diyaariyo ama bixiyo qarashaadka qaar ama daryeelkaaga caafimaad ("Bixiyahaaga") iyo in Bixiyaahaga uu bixinayo daryeelka caafimaad.

Si Loo fuliyo Shaqooyinka Daryeelka Caafimaadka. Waxaa laga yaabaa in aan isticmaalno oo lawadaagno PHI qaliinadeena daryeelka caafimaadka, taas oo ku jirto maamulida, qorsheynta hawlaha wanaajiya tayada iyo qarashaadka hooseeyo ee daryeelka aan gaarsiino. Tusaale, waxaa laga yaabaa in aan isticmaalno PHI si aan dib u eegno tayada iyo xirfada dhaqaatiirteena, kalkaalisooyinka, iyo adeeg bixiyayaasha kale

ee daryeelka caafimaadka. Waxaa laga yaabaa in aan isticmaalno PHI-gaada si aan u sameyno qiimeynta tayada iyo howlaha horumarinta, oo ay ku jiraan natiijooyinka iyo horumarka tilmaamaha caafimaadka. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aan u isticmaalno PHI-gaada in aan uga qeybqaadano howlaha bulshada ku saleysan ee la xiriiro horumarinta caafimaadka iyo yareynta qarashka daryeelka caafimaad. Sidoo kale, waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalno PHI-gaada in uu ku siiyo macluumaadka barnaamijyada la xiriiro caafimaadka ama waxyaabaha sida daaweynta caafimaadka kale iyo barnaamijyada.

V. Shaacinnada Aad Noo Fasixi Karto inaan Samayno

Ma isticmaali doono ama ma wadaagi doono PHI-gaaga iyada oo aan la helin oggolaanshahaaga, marka laga reebo sida lagu qeexay Ogeysiiskaan. Inta badan isticmaalka iyo shaacinta qoraalada daaweynta nafsiga ama qoraallada wax ka qabashada isticmaalka maandooriyaha, sida ku habboon, waxay u baahan yihiin oggolaanshahaaga. Ayadoo ay jiraan xadidaadu saaran, ma adeegsan karno ama shaacin karno PHI si aan ugu adeegsano suuqgayn adoon ogolaansho qoran bixin. Ma iibin karno PHI adoon na siin oggolaansho qoran. Waxaad na siin kartaa oggolaansho qoran ee la siticmaalo iyo/ama shaacinta PHI ga la siinaayo qof walba ujeedo kasta haka lahaadee. Haddii aad noo oggolaatid in aan isticmaalno ama shaaciso macluumaad noocaas ah, waxaad uga laaban kartaa oggolaanshahaas qoraal ahaan waqti walba.

VI. Adeegsiyad aiyo Shaacinnada Aad Fursada u haysato Inaad Diido

Adeegsiga ama Shaacinta Kaydka Xogta Bukaanka. Waxaa laga yaabaa in aan ku darno magacaaga, goobta isbitaalka, xaaalada guud ee caafimaadka iyo xubin ka ahaanshaha diinta ee hagaha bukaanka iyada oo aan la helin oggolaanshahaaga oo qoran illaa aad noo sheegtid in aadan ku rabin macluumaadka gudaha hagaha. Macluumaadka ku jirto hagaha waxaa lala wadaagi karaa qof walba oo ku weydiista magac ahaan ama xubnaha maamulka diinta; si kastaba, xubin ka ahaanshaha diinta waxaa kaliya oo lala wadaagayaa xubnaha maamulka diinta.

U shaacinta Qaraabada, Saaxiibada kugu Dhow iyo Daryeelayaashaada Kale. Waxaa laga yaabaa in aan la wadaagno PHI-gaada xubinta qoyskaaga/qaraabada, saaxiib gaar ah ee kuu dhow, ama qof kale ee aad u aqoonsatay haddii (1) kowdii aan ku siino fursada lagu diidayo shaacinta oo aanad diidin; (2) soo koob in aadan diidin shaacinta; ama (3) helida heshiiskaaga lagula wadaagayo PHI-gaada shaqsiyaadkaan. Haddii aadan joogin waqtiga aan wadaageyno PHI-gaada, ama aysan kuu suurtogaleynin in aad ogolaatid ama diidid wadaagideena PHI-gaada sababtoo ah kuuma suurtogaleyso ama waxaa jiro xaalad degdega ah, waxaa laga yaabo in aan u isticmaalno xukunkeena xirfadeed in aan ku go'aansano in wadaagida PHI ay tahay danaha ugu wanaagsan. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aan u isticmaalno ama wadaagno PHI-gaada si aan u ogeysiino (ama ku caawino ogeysiinta) shaqsiyaadkaan wax ku saabsan goobtaada iyo xaalada guud.

Xiriirada Lacag aruurinta. Waxaan la wadaagi karnaa shaqaaleena lacag aruurinta ee ku xadidan warbixin shaqsi ee adiga kugu saabsan (tusaale, magaca, ciwaanka, macluumaadka kale ee xiriirka, da'da, jinsiga, taariikhda dhalashada), oo ay ku jiraan taariikhda ee aan ku siino daryeelka caafimaadka, macluumaadka waaxda adeega, dhaqtarka daawaynaya, macluumaadka natiijada, iyo xaalada caymiska iyada oo aanay jirin oggolaansho qoran. Waxaan laga yaabaa in aan kuula soo xiriirno macluumaadka ku saabsan muhiimada tabarucyada ee Nationwide Children's Hospital iyo kugu casuumo ka qeybqaadashada. Haddii aadan rabin in aad heshid wax macluumaadka xariirada mustaqbalka, waad kalaaban kartaa helida xariirada noocaas ah adoo la xariiraaya Xafiiska Sirta ood ka helayso xogta xariirka ee hoose.

Isdhaafsiga Macluumaadka Caafimaadka. Waxaan qayb ka nahay hal ama dhowr is waydaarsi macluumaadka caafimaadka (HIEs) ah ee gobalka Ohio waxaana laga yaabaa inaan cid kale oonleen kula wadaagno xogtaada caafimaadka si loogu adeegsado daawayn, qarash bixin iyo shaqooyinka daryeelka Caafimaadka aana siino xirfadlayaasha kale ee caafimaadka ee oggolaanshaha haysta ee ku jira HIE gaan. HIEs wuxuu u oggolaanaya adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka si ay u helaan oo u isticmaalaan macluumaadka caafimaadka muhiimka ah ee laga maarmaanka u ah daaweynta iyo ujeedooyinka kale ee sharciga ah. Shaqsiyaadkeena sharciyada u haysta ayaa geli kara oo adeegsan kara xogtaada caafimaadka ee ka timid HIE la aqoonsan yahay. HIE ga la oggolaaday ee Gobalka Ohio ayaa leh difaacyada saxda ah ee maamulka, goobta iyo farsamada si loo dhawro sirta iyo amaanka xogtaada caafimaadka. Markaad codsato, waxaad "diidi" kartaa ka qaybgalka HIE, si buuxda ama qayb kamid ah. Foomka diidista ka qaybgalka ayaa lagu heli karaa inaad wacdo 614-355-0777 si aad u codsato nuqul. Haddii aadan diidin, waxaan siin karnaa xogtaada caafimaadka HIE ogolaansho u haysta kaasoo aan ka qaybgalno si waafaqsan sharciga quseeya. Go'aankaaga diidista ka qaybgalka HIE ga la ogolaaday, si buuxda ama qayb kamid ah, ayaa keeni kara in dhakhtar uu geli waayo xogta muhiimka u ah in dhakhtarku bixiyo daryeelka saxda ah.

VII. Isticmaallada kale ee Gaarka ah iyo Shaacinnada ee an Codsano ama oggolaanshaha aan u heysano inaan sameeyno U haysano inaan Samayno

Goortii Sharci ahaan Loogu baahdo. Waxaan shaacinaynaa PHI-gaada marka loo baahdo Federaalka walba, Gobolka ama sharciga deegaanka.

A. Howlaha Caafimaadka Bulshada. Waxaa nalaka rabaa ama naloo oggolyahay sharci ahaan in aan ku soo wargelino PHI hay'adaha dowlada qaarkood iyo kuwa kale. Tusaale, waxaan la wadaagi karnaa PHI-gaada sida soo socota:
   a. wargelinta macluumaadka caafimaadka ee maamulada caafimaadka bulshada ee ujeedada ka hortaga ama xakameynta cudurka, dhaawaca, ama curyaannimada;
   b. si looga warbixiyo xadgudubka la ogyahay ama laga shakiyay ama dayacaada ee hay'ada adeegyada illaalada carruurta bulshada ku haboon, sida nalooga baahanyahay in aan ku sameyn sharci ahaan;
   c. si looga warbixiyo macluumaadka ku saabsan waxyaabaha iyo adeegyada Maamulka Cuntada iyo Daroogada Mareykanka;
   d. si aad uga digtid qof laga yaabo in uu la kulmay cudur faafa ama haddii kale laga yaabo in uu halis ugu jiro horumarinta ama faafinta cudur ama xaalad;
   e. si aan u wargeliyo macluumaadka loo shaqeeyahaaga sida looga baahanyahay sida waafaqsan sharciyada sheegaya jirooyinka shaqada la xiriira iyo dhaawacyada ama illaalada caafimaadka goobta shaqada; iyo
   f. si looga hortago ama loo yareeyo halista iyo halista dhow ee qofka ee caafimaadka bulshada ama badbaadada ama hay'adaha dowlada qaarkood ee leh shaqooyinka gaarka ah sida Waaxda Gobolka.

B. Howlaha Kormeerida Caafimaadka. Waxaa laga yaabaa in aan la wadaagno PHI-gaada hay'ada kormeerida caafimaadka nidaamka daryeelka caafimaadka ee hubisa in sharciyada barnaamijyada caafimaadka dowlada, sida Medicaid, la raacayo.

C. Dacwdaha Maxkamadda iyo Maamulka. Waxaa laga yaabaa in aan ku wadaagno PHI-gaada xaalada dacwadaha maxkamadda ama maamulka ee quseeya amarka maxkamadda ama nidaamka kale ee sharciga.

D. Ujeedooyinka Fullinta Sharciga. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aan la wadaagno PHI-gaaga booliska ama saraakiisha ka ee sharci fullinta sida loogu baahdo ama sharciga oggolaado ama waafaqsan amarka maxkamadda ama damaanada ah.

E. Xarumaha Xabisga. Cid kale ayaan la wadaagaynaa PHI gaaga haddii aad ku jirto xabsi ama aad ku jirto saldhiga ciidanka booliiska, laakiin keliya waa markay muhiim u tahay (1) in xaruntu ku siiso daryeel caafimaadl (2) ay difaacdo caafimaadkaaga iyo badqabkaaga ama caafimaadka iyo badqabka dadka kale; (3) si loo dhawro badqabka iyo amaanka xarunta xabsiga ah.

F. Dadka dhintay. Waxaan laga yaabaa in aan la wadaagno PHI baadhaha maydka ama baaraha caafimaadka sida lagu ogolaaday sharciga.

G. Helitaanka Xubinta iyo Unuga. Waafaqsan sharciga lagu dabaqi karo, waxaa laga yaabaa in aan la wadaagno PHI hay'adaha fududeeyo helitaanka xubinta, isha, ama unuga, kaydinta, ama xubin beerista.

H. Cilmi baarista. Waxaa lagaa yaabaa in aan u isticmaalno PHI cilmi baarista. Ka hor inta aanan shaacin qaar ka mid ah PHI-gaada ee ujeedo cilmi baaris noocaas ah oo qaab laguu aqoonsan karo ah, mashruuca wuxuu quseynayaa dib u eegida balaaran iyo ansixinta nidaamka.

I. Magdhowga Shaqaalaha. Waxaa laga yaabaa in aan wadaagno PHI sida lagu oggolaaday sharciga gobolka ee loo baahanyahay ee la xiriirio magdhowga shaqaalaha ama barnaamijyada la midka ah ee kale.

J. Sida looga baahanyahay sharci ahaan. Waxaa laga yaabaa in aan isticmaalno oo la wadaagno PHI-gaada marka looga baahdo in sidaas lagu sameeyo sharci kale oo aan hadda ka hor kor lagu sheegin.

VIII. Isticmaalka iyo Shaacinta U baahan Oggolaanshahaaga Qoran

Ma isticmaaleyno ama siideyneyno PHI-gaada iyada oo aan jirin ogolaanshaha, aan ka aheyn sida lagu sheegay Ogeysiintaan. Waxaad na siin kartaa oggolaansho qoran ee la siticmaalo iyo/ama shaacinta macluumaadka caafimaadka ee qof walba oo ujeedo walba ah. Isticmaalkeena ama shaacintu waxay waafaqsanaaneysaa oggolaansho qoran ee noocaas ah. Haddii aad noo oggolaatid in aan isticmaalno ama shaaciso macluumaad noocaas ah, waxaad uga laaban kartaa oggolaanshahaas qoraal ahaan waqti walba.

Xaaladaha kale ee noocaas ah, waa in aan haysanaa oggolaanshahaaga qoran si aan u isticmaalno iyo/ama u wadaagno PHI.

A. Suuq geynta. Waa in aan helnaa oggolaanshaaga oo qoran ka hor isticmaalka PHI ee alaabada suuqgeyntaada, aan ka aheyn haddii xiriirka uu ku jira qaabka xiriirka isa soo horfadhiisi ah ee inaga aan u sameyno shaqsiyaadka, ama hadyada xayaysiiska ee qiimaha magacaaban ee inaga aan bixinay. Haddii suuqgeynta ay ku jirto lacag bixinta dhaqaalaha ee ka timaada koox saddexaad, oggolaanshaha wuxuu sheegayaa in lacag bixin noocaas ah ay ku lugleedahay. Si kastaba waxaa laga yaabaa in aan kaala soo xiriirno adiga alaabada ama adeegyada la xiriiro daaweyntaada, maamulida dacwada ama xiriiriyaha daryeelka, ama daaweynaha kale, daaweynada, adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka, ama goobaha daryeelka ayadoo aan jirin oggolaanshahaaga.

B. Iibinta PHI. Waa in aan helnaa oggolaanshahaaga oo qoran ka hor iibinta PHI-gaada, ama tusaalaha shaacinta PHI-gaada ay nagu sababtaa magdhow anaga.

C. Isticmaalka iyo Shaacinta Macluumaadkaaga si Saraysa u Qarsoodiga ah. Sharciyada federaalka iyo gobolka wuxuu u baahanyahay illaalada arrimaha qarsoodiga gaarka ah ee macluumaadka qarsoodiga qaarkood ee ku saabsan ("Macluumaadka Qarsoodiga Sare"), oo ay ku jiraan wixii qeyb ee PHI oo ah: (1) lagu hayay waraaqaha daaweynta cilmi nafsiga; (2) ku saabsan caafimaadka maskaxda iyo adeegyada curyaannimada horumarka; (3) ku saabsan alkoolada iyo ka hortagag isticmaalka daroogada, Daaweynta iyo gudbinta; (4) ku saabsan imtixaanka HIV/AIDS, baaritaanka ama Daaweynta; (5) ku saabsan cudurka galmada laga qaado; (6) ku saabsan baaritaanka ku saabsan hida sidaha; (7) ku saabsan xadgudubka carruurta iyo dayacaada; (8) ku saabsan weerarka galmada; ama (9) Tijaabooyinka Bacriminta iyo dawaynta hida sidaha (IVF). Wixii horay loo sheegay, waa in aan helnaa oggolaanshaaga qoran ee wixii isticmaal ama shaacin ah, aan ka aheyn in la sameeyo daaweynta qaar, lacag bixinta, ama qaliinada daryeelka caafimaadka. Ka hor inta aan wadaagin Macluumaadka Qarsoodiga Sare ah ee ujeedada aan ka aheyn kuwa sharci ahaan lagu oggolaado, waa in helnaa ogoglaanshaha qoran.

IX. Qarsoodiga Diiwaanada Dhibaatada Isticmaalka Maandooriyaha (Substance Use Disorder, SUD)

Qaar ka mid ah macluumaadkaaga caafimaadka waxaa laga yaabaa in lagu ilaaliyo sharciga federaalka ee hoos yimaada 42 CFR Qaybta 2-aad, kaas oo bixiya ilaalin dheeraad ah oo qarsoodi ah oo loogu talagalay diiwaannada la xiriira daaweynta khalkhalka isticmaalka maandooriyaha (SUD) ("Macluumaadka SUD". Ilaalintaan waxay khuseysaa marka lagu daro HIPAA.

1. Macluumaadka SUD ee laga helay Barnaamijyada Qaybta 2-aad ee aan la xiriirin Nationwide Children's Hospital.

- Haddii aan helno ama aan hayno macluumaad kasta oo adiga kugu saabsan oo ka socda barnaamijka daaweynta SUD ee 42 CFR Qaybta 2-aad ee la daboolay iyada oo loo marayo ogolaansho qoraal ah oo aad siiso Barnaamijka Qaybta 2 si loo isticmaalo oo loo shaaciyo diiwaankaaga ujeeddooyinka daaweynta, bixinta ama hawlaha daryeelka caafimaadka, waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno oo aan shaacino diiwaankaaga Qaybta 2-aad ee daaweynta, bixinta ama hawlaha daryeelka caafimaadka, sida ku cad Ogeysiiskaan. Oggolaanshahaan waxaa looga noqon karaa qoraal ahaan wakhti kasta.

- Haddii aan helno ama aan hayno diiwaannada Barnaamijka Qaybta 2-aad iyada oo loo marayo oggolaansho gaar ah oo aad na siisay adiga, Barnaamijka Qaybta 2-aad ama dhinac kale oo saddexaad ah, waxaan u isticmaali doonnaa oo shaacin doonnaa diiwaannadaada oo keliya sida si cad loogu oggolaaday oggolaanshaha naloo siiyay. Oggolaanshahaan waxaa looga noqon karaa qoraal ahaan wakhti kasta

- Marna ma isticmaali doonno ama ma shaacin doono diiwaannada Barnaamijka Qaybta 2-aad ama ma bixin doonno marag-fur qeexaya macluumaadka ku jira diiwaannadaas dacwad kasta oo madani ah, dambi, maamul, ama sharci-dejin ah oo adiga kaa dhan ah, haddii aan oggolaansho lagaa helin ama amar maxkamadeed ka dib marka adiga ama qofka haysta diiwaanka la siiyo ogeysiisyada loo baahan yahay iyo fursadda lagu dhageysan karo.

2. Macluumaadka SUD Waxaa sameeyay Rugaha Caafimaadka ee ay leedahay Nationwide Children's Hospital

Nationwide Children's Hospital wuxuu ka shaqeeyaa waaxo gaar ah oo ku takhasusay bixinta ogaanshaha cudurka, daaweynta, iyo gudbinta khalkhalka isticmaalka maandooriyaha ("Rugaha caafimaadka SUD"). Ilaalinada dheeraadka ah ayaa khuseysa macluumaadka SUD ee ay sameeyeen oo ay hayaan Xarumahaan SUD. Waxaan isticmaali doonaa oo aan la waadi doonnaa macluumaadkaaga SUD oo keliya Rugaha Caafimaadka ee SUD sida ku xusan qaybtaan ama ogolaanshahaaga qoran.

a. Isticmaalada La Ogol Yahay iyo Shaacinta Macluumaadka SUD iyada oo aan la oggolaan
   - In lala xiriiro dhakhaatiirteena iyo shaqaalaheena u baahan macluumaadka la xiriira waajibaadkooda ah inay bixiyaan ogaanshaha cudurka, daaweynta, ama gudbinta daaweynta marka isgaarsiintu ka dhaceyso (i) gudaha Rugta Caafimaadka SUD ama (ii) gudaha NCH oo la xiriira maamulka Rugta Caafimaadka SUD.
   - Ururada adeegga ee u qalma ee bixinaya adeegyada ayagoo anaga na matalaya oo ku aqbala qoraal ahaan inay ilaaliyaan Macluumaadka SUD si la mid ah sida nalooga baahan yahay inaan ilaalino Macluumaadka SUD.
   - Hay'adaha fulinta sharciga ama saraakiisha haddii aad gasho, ama aad ku hanjabto inaad gasho dambi ka dhaca xarumaheena ama aad kula kacdo shaqaalaheena.
   - In la soo sheego xadgudub iyo dayacaad carruur oo la tuhunsan yahay oo waafaqsan sharciga Ohio.
   - Shaqaalaha kale ee caafimaadka ee ku jira xaalad degdeg ah oo caafimaad oo xaalado gaar ah ku jira.
   - Ujeeddooyin cilmi-baaris oo waafaqsan oggolaanshaha Guddiga Dib u eegista Hay'adaha ("Institutional Review Board, IRB")
   - Shaqaale u qalma oo loogu talagalay baaritaanka ama qiimeynta barnaamijka kuwaas oo ogolaaday inay ilaaliyaan Macluumaadka SUD.
   - Hay'ada caafimaadka dadweynaha, haddii Macluumaadka SUD aan la aqoonsan.

b. Isticmaalida La Ogol Yahay iyo Shaacinta Macluumaadka SUD ee u Baahan Ogolaanshaha
   - Si loogu adeegsado daaweynta, lacag bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka. Waxaad na siin kartaa oggolaansho keliya oo la xariira dhammaan isticmaalka mustaqbalka ama shaacinta marka loo adeegsanaayo daaweynta, lacag bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka si loo hubiyo inaad hesho heerka ugu sarreeya ee daryeelka isku-dubbaridan. Marka Macluumaadkaaga SUD lala wadaago hay'ad ay HIPAA hoos timaado (sida dhakhtar daryeel caafimaad oo kale ama shirkad caymis caafimaad) ama la-hawlgale ganacsi (shirkadaha bixiya adeegyada magaca hay'adaha ay HIPAA hoos timaado), qaataha ayaa laga yaabaa inuu shaaca ka qaado macluumaadkaaga si loogu adeegsado daaweynta, lacag bixinta iyo hawlaha daryeelka caafimaadka ilaa inta uu HIPAA oggol yahay. Eeg tusaalooyinka shaacinta xogta ee loo adeegsanaayo daaweynta, lacag bixinta iyo hawlaha daryeelka caafimaadka ee Qaybta IV ee kore.
   - Diiwaangelin dhexe ama barnaamij kasta oo maamul ka noqosho ama daaweyn dayactir oo aan ka badnayn 200 mayl si looga hortago diiwaangelinta badan ee leh xaddidaadyo gaar ah.
   - Macluumaad gaar ah oo ku saabsan daawooyinka loo qoray ama loo qaybiyay barnaamijka la socodka daawada ee gobolka haddii uu u baahdo sharciga gobolka ee khuseeya.
   - Macluumaad gaar ah oo la xariira dadka ku jira nidaamka cadaalada dambiyada ee ka qayb qaadashada Rugta Caafimaadka ee SUD ka dhigay shuruud lagu xallinayo dacwad kasta oo dambiyeed oo ka dhan ah bukaanka ama sii-daynta bukaanka ama ka sii-daynta kale ee xabsi leh xaddidaadyo gaar ah.

3. Qodobo Dheeraad ah oo ku saabsan Macluumaadka SUD.
   - Macluumaadka SUD, ama marag-furka sharaxaya Macluumaadka SUD, looma isticmaali doono ama laguma shaacin doono dacwad kasta oo madani ah, dambi, maamul, ama sharci-dejin ah oo adiga kaa dhan ah, ilaa laga oggolaado ogolaanshahaaga ama amar maxkamadeed ka dib ogeysiis iyo fursad lagu dhageysto oo amarka maxkamaddu la socdo amar maxkamadeed oo ay weheliso amar maxkamadeed ama shuruudo kale oo sharci ah oo qasab ah oo lagu shaacinayo iyadoo la raacaayo shuruudaha sidaas darteed 42 CFR Qaybta 2-aad.
   - Macluumaadka SUD looma isticmaali doono ama looma shaacin doono ujeeddooyin lacag uruurin haddii aan lagu siinin ogeysiis cad oo muuqda iyo fursad aad ku dooran karto inaadan helin wax xiriir ah oo lacag uruurin ah.
   - Haddii aan si kale loogu xadidin Qaybtaan ama sida hoos wax looga badelay, dhammaan qodobada kale ee Ogeysiiskaan, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobneyn xuquuqda lagu sharraxay Qaybta X ee hoose, waxay khuseeyaan Macluumaadka SUD.

X. Xaquuqaha Bukaanka

A. Waxaad xaq u leedahay in lagu soo ogeysiiyo dhaqamadeena arrimaha gaarka ah. Dhaqamadeena la xiriiro ilaalinta arrimaha qarsoodiga ee macluumaadkaaga caafimaad waxaa lagu qeexay Ogeysiinteena Dhaqamada Arrimaha gaarka (NOPP). NOPP waxay ku sharaxeen sida aan u isticmaalno macluumaadkaaga si aan kuu siino daaweynta, si loo helo lacag bixinta daaweyntaas iyo shaqooyinkeena ganacsiga gudaha. Waxaa lagu siinayaa fursada lagu helayo koobiga warqada ee NOPP waqti walba ee aad booqatid. Goortii ugu horayn aad noqotid bukaankeena, waxaan ku weydiisan doonaa in aad ogolaato aqbalaadaada tilmaameysa in lagu siiyay fursada dib loogu eegayo iyo/ama lagu helayo warqada koobiga ee NOPP-geena. Nooca hadeer NOPP-geena waxaa sidoo kale laga arki karaa websaydkeena www.nationwidechildrens.org

B. Xaquuqda Wakiilka Gaarka ah. Waxaad noo caddayn kartaa dadka laga yaabo in ay u adeegaan wakiilkaaga gaarka ah, sida masuulka maxkamada loo magacaabay, si ku habboon loo sameeyay iyo awooda gaarka ah ee qareenka siinaya maamul noocaas ah, Awood Adag ee Qareenka oo Daryeelka Caafimaadka haddii ay u ogolaato qofka noocaas ah in uu ku dhaqmo marka aadan awoodin in aad nafsadaada u hadashid, ama qaab kale ee uu aqoonsanyahay sharciga lag udabaqayo. Waxaa laga yaabaa, si kastaba, in aan diidno wakiilka haddii, xukunkeena xirfadaha, aan go'aansano in aysan aheyn danahaaga ugu wanaagsan.

C. Waxaad xaq u leedahay in aad codsatid helitaanka macluumaadka caafimaadka.

a. Waxaad xaq u leedahay in aad aragtid oo heshid koobiga macluumaadka caafimaadka ee laga yaabo in loo isticmaalo in ay go'aano adiga kugu saabsan gaadhaan, sida qoraalada kalkaalisada, baaritaanada sheeybaarka, qoraalada daawada, iyo qorshayaalka daaweynta. Waxaad sidoo kale laga yaabaa in xaaladaha qaar aad ku heshid dulmarka macluumaadka caafimaadkaan. Waa in aad sameysaa cosdi qoraal ah ee aad ku baareysid iyo koobiga macluumaadka caafimaadkaaga. Foomka codsiga waxaa lagu heli karaa boosto ahaan ee ciwaanka hoose, waxaa laga dajisan karaa websaydkeena, ama waxaad soo wici kartaa 614-355-0777 si aad u codsatid koobiga. Waxaa laga yaabaa in aan ku soo dalacno khidmad macquul ah koobiyo walba.

D. Xaaladaha qaarkood ee xadidan, waxaa laga yaabaa in aan diidno codsigaaga lagu baarayo iyo lagu koobiyeynayo macluumaadka caafimaadkaaga. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in aadan akhriyin ama lagu siinin koobiga qoraalada daaweynta cilmi nafsiga; xogta loo soo aruuriyay isticmaalka rayidka, dambiga, ama falka maamulka, ama dacwada maxkamada; iyo PHI qaarkood ee sharciga ku illaalsan. Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in aad xaq u yeelataan in go'aankaan dib loo eego. Fadlan la xiriir Waaxda Maamulka macluumaadka Caafimaadka (Health Information Management Department) ee 614-355-0777 haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan helitaanka diiwaankaaga caafimaadka. Waxaad xaq u leedahay in aad codsatid waxa aan kala hadalnay macluumaadkaaga caafimaadka dadka kale.

a. Haddii aad jeclaan laheyd qaar kamid ah macluumaadkaaga caafimaadka loo diro qof kale, tusaale dhakhtar kale ama loo shaqeeyaha, waxaad u baahaneysaa in aad buuxisid foomkeena oggolaanshaha ee tilmaamaya in aad ogolaatay shaacinteena (bixinaya) siinayo macluumaadka dadka kale ee aad dooratay. Foomka ogolaanshaha waxaa lagu heli karaa boosto ahaan ee ciwaanka hoose, waxaa laga dajisan karaa websaydkeena, ama waxaad soo wici kartaa 614-355-0777 si aad u codsatid koobiga.

b. Marka aad noo ogolaatid in aan shaacino macluumaadkaaga caafimaadka, ma damaanad qaadi karno in qofka macluumaadka la siiyay uusan shaacin doonin macluumaadka. Waxaad gadaal u qaadan kartaa ama uga "laaban kartaaa" oggolaanshahaaga qoran waqti walba, oo qoraal ahaan, adiga oo boosta ku soo diraya ama iimayl ahaan ka guuristaada ciwaanka hoose, aan ka aheyn haddii aan mar hore ku dhaqannay si ku saleysan ogolaanshahaaga.

c. Haddii aan joogteyno diiwaanka caafimaadka korontada ee wata macluumaadkaaga caafimaadka, goorta iyo haddii aan ugu baahannahay sharci ahaan, waxaad xaq u yeelaneysaa in aad codsatid in aan kuu soo dirno koobiga macluumaadkaaga caafimaad oo qaab koronta ahaan adiga ama kooxda saddexaad ee aad sheegtay. Waxaa laga yaabaa in aan ku dalacno khidmad macquul ah ee dirista koobiga korontada ee macluumaadkaaga caafimaad.

E. Waxaad xaq u leedahay in aad codsatid in aad baddeshid macluumaadkaaga caafimaadka.

a. Waxaad xaq u leedahay in aad weydiisid in aad baddeshid macluumaadka caafimaad ee aan kaa hayno haddii aad aaminsantahay in macluumaadka caafimaadka ay qaldantahay ama aanan dhameystirnayn. Codsigaaga waa in uu ahaadaa qoraal ahaan iyo sheeg sababaha loo codsaday baddelka. Foomka baddelka waxaa lagu heli karaa boosto ahaan ee ciwaanka hoose, waxaa laga dajisan karaa websaydkeena, ama waxaad soo wici kartaa 614-355-0711 si aad u codsatid koobiga. Fakiska, iimeelka ama boosto ahaan ugu dir codsiga ciwaanka ku qoran hoos. Waxaan dib u eegeynaa macluumaadka sida la codsaday oo midkood sameeynaa saxida ama ku soo ogeysiinaa sababta aan ugu maleynay in macluumaadkayagu uu sax yahay. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaad nasiin kartaa diidmo qoraal qoran ee go'aankeena ah in aan joogteyneyno macluumaadkaaga caafimaad.

F. Waxaad xaq u leedahay in aad codsatid in aad heshid xiriirada la xiriiro caafimaadka oo qaabka kale ah ama goobaha kale.

a. Waxaan sida caadiga ah u dirnaa macluumaadkaaga daryeelka caafimaadka ciwaanka iyo lambarada taleefonka ee aad sheegtay. Si kastaba, haddii aad jeclaan laheyd in macluumaadkaaga meel kale laguugu soo diro si aad u ilaalisid arrimahaaga qarsoodiga, sidaas oo kale waad sameyn kartaa. Ma ku weydiineyno in la sharaxo sababta aad u sameyneysid cosdiga. Waxaan oggolaaneynaa codsiyada macquulka ah. Si loo fuliyo codsiga, waxaan ku weydiineynaa ciwaan kale aam wado kale ee kula soo xiriiri karto, tusaale ahaan, lagu soo dirayo sanduuqa xafiiska boostada. Foomka xiriirka qarsoodiga waxaa lagu heli karaa boosto ahaan ee ciwaanka hoose, waxaa laga dajisan karaa websaydkeena, ama waxaad soo wici kartaa 614-355-0711 si aad u codsatid koobiga. Boosto ugu dir ama iimayl codsigaaga ciwaanka hoos ku qoran ama keen foomkaaga la buuxiay goob walba oo Diiwaanka Bukaanka.

G. Waxaad xaq u leedahay xaqa lagu codsanayo xayiraadaha ee isticmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaad.

a. Waxaad xaq u leedahay xaqa lagu weydiinayo isticmaalada ama shaacinta macluumaadkaaga caafimaad oo daaweyn ah, lacag bixinta, ama qaliinada daryeelka caafimaadka. Waxaad sidoo kale leedahay xaqa lagu weydiinayo in la xadido u shaacinta xubnaha qoyska ama dadka kale ee ku luglahaa daryeelkaaga caafimaad ama lacag bixinta daryeelka caafimaadkaaga. In kastoo aan tixgelino codsigaaga, fadlan ka taxadar in aan waaafqsanahay wax masuuliyad ah lagu ogolaanaya ama loogu hogaansamaya iyada ilaa codsiga la xiriiro shaacinta PHI ee qorshaha caafimaad oo ujeedooyinka sameynta lacag bixinta ama qaliinada daryeelka caafimaadka, iyo PHI-ga quseeeyo kaliya adeega daryeelka caafimaadka ee bixiyaha laga siiyay lacagta buuxdo jeebka. Foomka codsiga xadeynta waxaa lagu heli karaa boosto ahaan ee ciwaanka hoose, waxaa laga dajisan karaa websaydkeena, ama waxaad soo wici kartaa 614-355-0711 si aad u codsatid koobiga. Boosta ahaan ugu dir ama iimaylka codsiga ciwaanka hoos ku qoran.

b. Haddii aad jeebkaaga ka bixisay lacagta oo buuxdo ee adeegyada gaarka ah, waxaad codsan kartaa in PHI ku saabsanyahay in adeega aan loo siideynin qorshahaaga caafimaad. Foomka "Ha Dirin Caymiska" waxaa lagu heli karaa boosto ahaan ee ciwaanka hoose, waxaa laga dajisan karaa websaydkeena, ama waxaad soo wici kartaa 614-355-0711 si aad u codsatid koobiga. U keen foomkaaga la buuxiyay goobta Diiwaangelinta Bukaanka.

c. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aan qabno xeerarka carruurta yar ee loo oggolyahay in canugaaga yar codsado xadeynada qaarkood ee helitaankaaga macluumaadkaaga caafimaad.

H. Waxaad xaq u leedahay inaad codsato isla xisaabtan ku aadan dadka aan u gudbinay macluumaadkaaga caafimaadka. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho isla xisaabtan ku aadan qaar ka mid ah shaacinnada macluumaadkaaga caafimaad ee aan sameynay lixdii sano ee ka horreysay codsigaaga, ama saddexdii sano ee ka horreysay codsigaaga diiwaannada elektarooniga ah ee ka kooban Macluumaadka SUD. La xisaabtankan kuma jirto shaacinta macluumaadka la sameeyay: (i) daaweynta, lacag bixinta, iyo ujeedooyinka qaliinada daryeelka caafimaad; (ii) ee adiga ah ama sida waafaqsan oggolaanshahaaga; (iii) ee hay'adaha asluubta ama saraakiisha fullinta sharciga xabsiga; (iv) ee hagaha bukaankeena ama qofka ku lug leh daryeelkaaga; iyo (v) shaacinta kale ee sharciga faderaalka uusan nooga baahneyn in aan xisaabtan siino. Foomka codsiga la xisaabtanka waxaa lagu heli karaa boosto ahaan ee ciwaanka hoose, waxaa laga dajisan karaa websaydkeena, ama waxaad soo wici kartaa 614-355-0711 si aad u codsatid koobiga. Boosta ahaan ugu dir ama iimaylka codsiga ciwaanka hoos ku qoran.

I. Maadaama ay la xiriirto Macluumaadkaaga SUD, waxaad xaq u leedahay inaad codsato liis shaacin ah oo uu sameeyay dhexdhexaadiye 3-dii sano ee la soo dhaafay. Dhexdhexaadiye waa hay'ad heshay Macluumaadka SUD iyadoo la raacaayo magacaabis guud oo la adeegsanaayo oggolaanshaha bukaanka oo hagaysa shaacinta hal ama in ka badan oo ka qaybgalayaasha ah oo xiriir daaweyn la leh bukaanka. Tusaale ahaan dhexdhexaadin waa Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka ("Health Information Exchange, HIE"), Ururka Daryeelka Isla Xisaabtanka Leh ("Accountable Care Organization, ACO"), ama urur cilmi baaris.

J. Waxaad xaq u leedahay in aad sheegtid walaacyada ama in aad weydiisid su'aalo. Haddii aad qabtid wax walaacyo ah ee ku saabsan arrimaha qarsoodiga ee macluumaadkaaga caafimaad ama haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan nidaamyadeena, waxaad kala xiiiri kartaa Sarkaalkeena Arimaha qarsoodiga ee:

Nationwide Children's Hospital
Feejignaanta: Nationwide Children's Hospital ACE Privacy Officer
700 Children's Drive
Columbus OH 43205
PrivacyOffice@NationwideChildrens.org
(614) 355-0711

K. Waxaad xaq u leedahay in aad xareysid cabasho. Haddii aad aaminsantahay xaquuqdaada arrimaha qarsoodiga ah in lagu xadgudbay, waa in aad ku xareysaa cabashada ciwaanka kor ku qoran. Waxaad sidoo kale ogeysiin kartaa Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Mareykanka cabashadaada (U.S. Department of Health and Human Services) ee: http://www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/index.html.

Ma qaadenyno wax tallaabo ah oo ka soo horjeedo gudbinta cabashada.